



## Julie Esparza Brown oo tusaale noqotay iyada oo noqotay xubintii u horreysay ee ka tirsan Guddiga Latino ee PPS

Markii ay Julie Esparza Brown soo koraysay, weligeed ma yeelan aragti mustaqbal oo dhanka tacliimeed oo ah in ay u adeegto jiilasha macallimiinta ee mustaqbalka. Esparza Brown waa jiilkii-saddexaad ee Chicana ka soo jeeda, oo ku kortay Encinitas, oo ah bulsho xeebeed ku taala Degaanka San Diego, halkaasi oo uu waalidkeeda shaqada gacanta qaban jiray ay dagaal u galeen in ay jabiyaan dhaqanka soo jireenka ah ee laga filayay carruurtooda.

“Hooyaday waxay jeclayd wax akhriska waxayna gacan ka geysatay in ay ii diyaariso mustaqbalka,” ayay sheegtay Esparza Brown, oo ah Guddoomiye Ku xigeenka Guddiga Waxbarashada PPS. “Wax akhriska iyo waxbarashadu waxay furtaa albaabka.”

Waayo-aragnimada Esparza Brown waxay qaab u yeeshay sida ay u wajahayso shaqadeeda iyada oo ah xubin Guddiga ka tirsan iyo shaqadeeda ay kaaliye macallin oo sare ka tahay Jaamacadda Gobolke Portland Waaxdeeda Waxbarashada Gaarka ah. Waxbarashadeeda u gaarka ah ee kulliyadda waxaa suurtageliyay deeqo waxbarasho iyo lacago deeq ah, waxaana dhiirrigeliyay albaabada ay taasi u furtay iyada, waxay qortay lacago deeq ah oo wadartoodu tahay in ka badan \$5 malyuun si loogu bixiyo waxbarasho loogu talagalay ardayda ku hadasha labada luqadood/labada dhaqan leh lab ah ee doonaya in ay noqdaan macallimiin.

Esparza Brown waxaa soo food saaray dhibaatooyin dhanka dhaqanka la xiriira intii ay hawsha ku soo jirtay. Aabaheed waxaa loo diray “dugsiga lagu Maraykanoobo isaga oo ahaa ilme ku nool Degaanka San Diego, halkaasi oo uu ka helay tacliin hoose. Iyada oo ardayad dhigata Jaamacadda Willamette dabayaaqadii sanadihii 1970-yadii, Esparza Brown waxay ahayd shan ka tirsan ardayda Latinx oo ka tirsanaa dhismaha dugsiga ee ku yaalay Salem. Waxay xasuusataa iyada oo ay dhibaateeyeen isla markaana ay joojiyeen boolisku iyada oo baabuur ku dhex wada Koonfurta Oregon.

Iyada oo sababtu tahay waayo-aragnimadani iyo kuwo kale, Esparza Brown waxay dareen wanaagsan ka qabtaa siinta ardayda oo idil la siinayo fursado loo siman yahay, taasi oo ah wax ay aaminsan tahay in uu si gaar ah muhiim ugu yahay jawiga siyaasadeed iyo bulsho ee hadda jira.

“Jawiga jiraa waa mid cabsi u leh qoysaska iyo carruurta midabyada kala duwan leh,” ayay sheegtay. “Xaqiiqada dhabta ah ee siyaasadeed iyo sharci ee jirta ayaa hubaal la’aan iyo walwal u keenaysa ardayda, sidaa darteed waa muhiim in aan sidii hore si ka muhiimsan u fahamno baahiyaha dhammaan ardaydeena iyo bulshadeena.”

Dabaaldega Bisha Hidaha ee Isbaanishka, Sibtambar 15-Oktoobar 15, waxay rajo cusub u keenaysaa Esparza Brown. Waxay 2015-kii u oroday boos ka tirsan Guddiga PPS si ay wax uga beddesho nolosha ay ku nool yihiin ardayga nugal. Martin Gonzalez wuxuu ahaa xubintii u horreysay ee ka tirsan Guddiga Latino ee PPS, isaga oo soo shaqeeyay 2009-2013. Esparza Brown waa qofkii u horreeyay ee Latina ah ee la doorto.

“Anigu ma arag qof aniga ii eg oo ka tirsan hoggaanka markii aan soo korayay,” ayay sheegtay. “Waxaan rabaa in aan dadka kaga daydo muhiimada ay leedahay in lagu lug yeesho bulshadaada, gaar ahaan ardayda midabyada kala duwan leh. Wax ka ogow awoodaha aad leedahay oo qayb ka geysa, dadka la wadaag aragtidaada gaarka ah.”

Marka ay sanadkeedii u dambeeyay ku jirtay dugsiga sare, macallin ayaa Esparza Brown ka caawiyay in ay yeelato aragti ku aadan fursadaha horyaalay. Waxay heshay deeq waxbarasho oo buuxda si ay dhigato Willamette, halkaasi oo ay baratay Wax Ku Daaweynta Dhanka Muusikada. Waxay sii waday in ay shahaadada u sareysa ee doctorate-ka ka qaadato Jaamacadda Gobolka Oregon, halkaasi oo ay ka tahay kaaliye macallin oo sare oo dadka wax bartaa, oo samaysa cilmi baaris isla markaana waxyaalo loogu talagalay daabacaadaha qaranka iyada oo diirada la saarayo waxbarashada gaarka ah ee loogu talagalay ardayda ku hadasha labada luqadood. Cilmi-baaristeeda haddu waxay xooga saartaa taageerada baahiyaha dhanka akhriska/qoraalka ee ardayda, gaar ahaan kuwa baranaya Ingiriisiga.

2019-ka waxay soo saari doontaa buug ay qof wada qoreen, “Taageerida Dadka Baranaya Ingiriiska ee Fasalka dhexdiisa – Hababka Ugu Fiican ee loogu talagalay Kala soocida Helitaanka Dhanka Luqadda marka la eego Naafanimada Dhanka Waxbarashada.”

Qoyska ayaa sidoo kale muhiim u ah Esparza Brown. Waxay leedahay saddex carruur ah iyo laba carruur ah oo ay ayeey u tahay oo ku nool Pacific Northwest iyo California. Wakhtigeeda firaaqada ah waxay jeceshahay safarka, wax akhriska, cunto karinta, dhageysiga muusikada, masraxa, ciyaarta muusikada piano iyo lugaynta duurka ‘hiking’.

Esparza Brown waxay gashay sanadkeedii afaraad ee ay ka tirsan tahay Guddiga, uma muuqato in ay shaqadeedu tahay mid gaabinaysa.

“Waxaan ku jirnaa waa cusub oo leh hoggaamiye cusub oo ay jiraan fursado aan dhammaad lahay,” ayay sheegtay. “Waxaanu PPS ka dhinayгаа mid wax ku ool ah waxaan haysanaa istiraatiijiyado lagu yaraynayo farqiga dhanka guul gaarida. Waxaanu leenahay taariikh la xiriirta macallimiin, shaqaale iyo waalidiin dadaalaya. Fiiri xeerka la ansixiyay ee maalgelintii daymeed ee u dambaysay. Oo waxaan u baahanahay in aan xasuusano in aan wax ku dhiseyno dadaalo ay sameeyeen dadkii inaga soo horreeyay.”

*-Rosie Fiallo*